**XUKUMADDA SOOMAALIYA**

**SHARCIGA 15 Jannaayo 1959, lamba. 3 rep**

**Sharciga Daabacaadda.**

**MAAMULAHA**

**Marka uu arkay oggolaashaha Golaha Xeer-dejinta;**

**WUXUU OGGOLAADAY OO ANSIXIYAY**

Xeerka soo soo socda;

## Qod. 1
## Qeexidda Daabacaadda iyo wax Daabacan

Marka la eego ulajeeddada xeerkaam waxaa loo tixgalinayaa daabacad iyo wax la daabacay qorista qoraal kasta oo loo adeegsaday makiinad ama cilmiga fiisikada iyo kimikada ama qaab kasta oo wax lagu baahiyo.

## Qod. 2
## Tilmaamaha Khasabka ah

Daabacaad kasta waa in ay ka muuqataa meesha lagu daabacay iyo sanadka la daabacay sidoo kale magaca iyo deeganka daabacaha iyo, haddii uu jiro magaca tifatiraha. Wargaysyada, baahinada hay'adaha wararka macluumaadka iyo kuwa xilliyada soo baxa nooc kasta ha ahaadaane waa inay leeyihiin tilmaamahaan:

- — goobta iyo taariikhda la baahiyay;.
- — magaca iyo deegaanka daabacaha;
- — magaca milkiilaha iyo aggaasimaha ama aggaasime ku-xigeenaka masuulka ka ah.

## Qod. 3
## Agaasimaha Masuulka ah

Wargeys kasta waa in uu leeyahay agaasime masuul ka ah. Agaasimaha masuulka ah waa in uu Soomaali yahay waana in uu ahaadaa muwaadin wax dooran kara lana dooran karo.

Marka agaasimaha masuulka ah uu hayo xil baarlamaaneed, waa in uu magacaabaa agaasime ku-xigeen masuul ka noqonaya oo leh isla shuruudaha lagu soo sheegay faqradda kore. Isagu wuxuu noqonayaa masuulka halkii uu ka noqon lahaa agaasime.

## Qod. 4
## Milkiilaha

Si loo soo saaro wargeys ama xilliyeed kale milkiilaha waa in uu leeyahay shuruudaha ah in la dooran karo iyo in uu wax dooran karo.

## Qod. 5
## Diiwaangelinta

Wargeys ama xilliyeed lama soo saari karo haddii aan laga soo diiwaanglin Kaalinta Maxkamadda Gobolka nawaaxiga meesha wax lagu baahinayo. Diiwaangelinta waxaa loo baahanyaha in la geeyo Kaalinta shaqada ku leh:

1. — Caddayn wadata saxiix la tasdiiqiyay ee milkiilaha iyo agaasimaha ama agaasime

ku-xigeenka masuulka ah oo magaciisa iyo deegaankiisa meesha ku cadyahay sidoo kale cinwaanka iyo nooca waxa la baahinayo;

2. — dokumentiyo caddaynaya hayasashada shuruudaha ku xusan qodobada 3 iyo
3. — nuqul ka mida qoraalka lagu dhisay iyo xeerka haddii milkiiluhu uu yahay shaqsiya qaanuuneed.

Garsooraha Maxkamadda Gobolka ee shaqada ku leh dhul ahan wuxuu hubinayaa saxnaanta dokumentiyada, wuxuuna amrayaa 15 cisho dhexdood in lagu qoro wargeyska ama xillyeedlaha buugga gaarka ee lagu hayo Kaalinta. Buuggaasu waa mid dadweynaha u furan.

**Qod. 6**
**Isbaddallada**

Isbaddal kasta oo ku yimaada arrimaha la soo sheegay caddaynta ku xusan qodobada sare waa in uu noqdaa mowduuc caddayn cusub oo ay tahay in la xareeyo 15 cisho gudahood isbaddalladas iyado ay la socdaan wixii dokumentiyo ah.

Qoraalka isbaddalka waxaa loo sameynayaa qaababka lagu tilmaamay faqradda saddexaad ee qodobka sare.

**Qod. 7**
**Dhicitanka Diiwangelinta**

Wax ku oolnimada diiwaangelinta waxay joogsanaysaa haddii, lix bilood gudahood oo ka bilaabata taariikhda la sameeyay aan la baahin amase uu ku yimaado hakad muddo hal sano ka badan.

**Qod. 8**
**Jawaabta iyo Sixitaanka**

Agaasimaha ama Ku-xigeenka masuulka ah waxaa ku waajiba in uu ka dhigo xiliyeedlaha si dhammaystiran oo lacag la'aana jawabaha, sixitaanada ama caddaymaha dadka qoraallada wax looga sheegay ama fikradaha meel ka dhaca ku ah sharafta oo la aaminsanyahay in ay yihiin kuwo runta ka fog, waxase shardi ah in jawaabaha, sixitaanka iyo caddaymahu in aanay ahayn kuwa keenaya dambi ciqaabeed.

Faafinta lagu soo sheegay faqradda sare waa in la sameeyaaay saddex maalmood gudahood kuwa maalin laha iyo tirada xigta ee kuwooda kale ee xilliyeedka, isla daabacadda, bogga ama cinwaanka wargayska iyo isla dabeecadaha qoraalka uu ku soo baxay. Diidmada u hoggaansanaanta waajibkaan waxaa lagu qaadayaa illaa lix bilood oo xarig ah iyo ganaax ah sh. so. 800.

Xukunka waa in lagu baahiayaa isla wargeyska. Isla xukunkaas, haddii arrintu ay jirto waa in lagu amraa in uu daabaco maqaalka horay loo dayacay. Saxitaanka kama badnaan karo dhererka maqaalka ama tallaabada loola jeedo. Sikastaba isagu wuxuu gaari karaa labaatan sadar haddii maqaalka ama tallaabada la saxaya dherer ahaan ay yartahay

**Qod. 9**
**Faafinada Khasabka**

Marka lagu dhawaaqayo xukunada ciqaabta ee lagu galay faafinada wargayska, Garsooraha shaqada ku leh wuxuu amrayaa si kastaba in uu xukunka, gebiahaan ama qayb kamida wargayska isaga lagu daabaco. Agaasimaha masuulka ka ah waa in uu lacag la'aan ku fuliyaa maqaalka si xeerka waafaqsan.

**Qod. 10**
**Masuuliyadda Madaniga**

Dambiyada daabacaadda lagu galo, waxaa madani ahaan si wadajira uga masuula noqonay qofka dambiga galay, milkiilaha iyo tifatiraha.

**Qod. 11**
**Magdhowga Lacageed**

Haddii daabacaadda lagu galo aflaagaaddo/cay, qofka la aflagaadeeyay kasakow magdhowga dhibaatooyinka loo gestay sida uu qabo xeerka ciqabta, wuxuu weydiisan karaa lacag magdhow ah.

Lacgtaas waxaa lagu goynayaa kolba inta uu la egyahay culayska dambiga iyo sida uu u faafay maqalka.

**Qod. 12**
**Daabacaadda Qarsoon**

Qof kasta oo ku dhaqaaqa daabacaadda wargeys ama mid xilli kala duwan soo baxa iyadoo aan la samayn diiwaangelinta ku xusan qod. 5, wxaa lagu ciqaabayaa illaa sanad xarig ah iyo ganaax ah sh. so. 800.

Isla ciqaabtaas waxa lagu qaadayaa cid kasta oo faafisa daabacaad aan xilliyeed ahayn oo aanay ka muuqan magaca tifatiraha iyo weliba qofka daabacay ama  sheegay wax runta ka fog.

**Qod. 13**
**Dayacaadda Tilmaamaha Khasabka ah**

Marka laga yimaado waxyaabaha lagu sheegay qodobada sare cid kasta oo wax ka baddasha, dayaca ama si aan sax ahayn u sheegta tilmamaha lagu sheegay qod. 2 waxaa la ganaaxayaa sh. so. 200.

**Qod. 14**
**Dayca Cadaynta wax ka Baddalka**

Qofkii aan ku samayn wax ka baddalka caddaynta muddada lagu sheegay qod. 6 ama iska sii wata daabacaadda wargeyska ama mid xilliedka kale kadibna diida in uu baddalo qoraalka, waxaa lagu ganaxaaa illaa ash. So 400.

**Qod. 15**
**Caddaynta Beenta ah**

Qofkii caddaynta lagu sheegay qodobada 5 iyo 6  ku sheega xog aan run ahayn waxaa lagu qaadayaa ciqaabta u dhigan xeerka ciqaabta ee ku u saabsan ka been sheegidda xagga fikirka ee warqad dawladeed.

**Qod. 16**
**Iqtisaaska**

Dacwadaha lagu galo daabacaadda waxaa qaadaya Garsooraha Degmada, Garsooraha Gobolka ama Mxkamadda dambiyada Culus (Assisse), iyadoo loo egayo kolba iqtisaska maaddada iyo tan dhulka.

**Qod. 17**
**Dabacaadaha Horay u Jiray**

Arrimaha ku saabsan wargeysyada iyo xilliyeedyada horay u jiray xeerkan hortiis waa in ay soo soo buuxiyaan qaababka laga doonayo muddo ku siman 30 cisho oo laga bilaabo marka uu xeerkaanu dhaqangalo waxaase shardi ah in daabacaadu ay si joogta ah loo sameeyo. Haddii ay daabacaadda ay tahay mid mar-mar la sameeyo iyada lama samayn karo haddii aan marka hore la marin qaababka xeerkanu dhigayo.

**Qod. 18**
**Ka Dhaafidda**

Wargeysyada iyo kuwa xilli ku soo baxa ee Dawladda xeerkaan laguma dabbaqayo.

**Qod. 19**
**Hirgalinta Xeerarka**

Xukuumadda waxay u fasaxantahay in ay dekereeto ku soo saarto xeerarka lagama maarmaanka u ah hirgalinta xeerkaan.

**Qod. 20**
**Dhaqangalka**

Xeerkaanu wuxuu dhaqangalayaa maalinta lagu baahiyo Faafinta Rasmiga ee Soomaaliya.

Xeerkaan waxaa lagu biirinayaa Uruurinta Rasmiga ee Dawladda waxaana lagu baahinayaa Fafinta Rasmiga. Cid kastana waxaa ku waajiba in ay u hoggaansato iyo adddeecdo ka xeer ahaan Soomaaliya.

Muqdisho, 15 Jennaayo 1959.

Maamulaha

**Mario Di Stefano**

**Cabdullaahi Ciise Maxamuud**